Doonaya Dhagaysiga Xidhistaada Sharci darada ah (Barabixinta)

- Waxaad dhammaan waraaqaha xaqiiqda ah ee aan ku lifaaqno ka heli kartaa halkan WashingtonLawHelp.org.

- Sharciga barabixintu wuxuu ku socdaa in la badalo. Ka akhri isbadaladii ugu dambeeyay ee sharciga WashingtonLawHelp.org/resource/eviction

- **Kiraystayaasha aan dakhliga badan haysan waxa loo magacaabay qareen lacag la'aan ah ka hor intaanay maxkamadu ku dhaqaaqin barabixinta. Naga soo wac khadka kala Saarida Difaacista Barabixinta 1-855-657-8387 ama si onlaayn ah uga codso qaybtan nwjustice.org/apply-online hadii aad filayso inaad u qalanto.**

Miyaan isticmaali karaa kan?

Haa, hadii labadanba ay yihiin ay run yihiin:

1. Milkiilaha gurigaagu wuxuu ku siiyay waraaqo maxkamadeed oo la yiraahdo Yeedhmo iyo Cabashada Maxbuuska Sharci darada ah.

2. Waxaad kasoo jawaabtay adigoo gudbinaya ugu yaraan Ogaysiiska Muuqaalka. Qorshahaaga si aad uga dagaalanto barabixinta.

Waa maxay dhagaysiga Maxkamada Dib loo Dhigay?

Hadii aad hesho **Amar ah in Maxkamadii Dib loo Dhigay** kaasoo leh Yeedhmooyin iyo Cabashooyin, mulkiiluhu wuxuu mudeeyay dhagaysiga maxkamada ee barabixinta. Kelmada sharciga ah ee barabixinta dhagaysiga maxkamadu waa **Dhegaysiga Maxkamada Dib loo Dhigay**.

Hadii aad hesho Amar ah in Maxkamada Dib loo Dhigay dib loo dhigay oo aad doonayso inaad ka dagaalanto barabixin, waa **inaad aadaa dhagaysi**. Kaliya kuguma filna:

- Inaad gudbiso Ogaysiiska Wargalinta ama Jawaabta
- U gudbi kiradaada Madax Shaqaalaha Maxkamada

Sheeg goorta iyo goobta dhagaysigu noqod doono?

Taariikhda iyo wakhtigu waxay noqon doonaan kuwo Amar ah in Maxkamada Dib loo Dhigay. **Waa inaad wakthigeeda timaado!** Maxaa yeelay COVID-19, dhagaysiga maxkamado badan ayaa hada ku dhaca hab onlaayn ah. Dhokumantiyada kuu sheegaya marka dhagaysigaaga la qabanayo waa macluumaadka sida loo galayo habka onlaaynka ah ama halka aad tagayso hadii dhagaysigu yahay mid shaqsi ah. Hadii aad hayso wax su'aal ah, wac shaqaalaha markamaada sare ee maxaliga ah.

Maxaa dhacaya marka Dhagaysiga Maxkamada Dib loo Dhigo?

❖ Hadii dakhligaagu hooseeyo, maxkamadu waxay ku siin doontaa jaanis aad ku hesho qareen loo magacaabo kiiska barabixintaada. Dhagaysiga maxkamadaada, waydii maxkamada inay dib u mudayso (sii wado) dhagaysiga markaa waxaad heli doontaa qareen loo magacaabo kiiskaaga. Waa inaad ku adkaysataa xaqan xataa hadii qaadigu uu doonayo inuu kiiska sii wado adigoo aan qareen haysan.

Xaakinka ama komishaneerku (sida qaadiga, lakin kaliya qaban kara noocyo gaar ah oo kiisaska maxkamada ah) ayaa go'aamin doona hadii aad leedahay difaacis wanaagsan oo ku haboon barabixinta. Waxaad ku guulaysan kartaa kiiska halka saxda ah. Ama qaadigu wuxu ku siin karaa kulan dhamaystiran si aad uga dagaalanto barabixinta.

Qaadiga kaasoo ka fikiraya doodaada ma haysto si uu si awood leh u dhaho (sharciga)

- In mulkiiluhu uu kuu saari karo si degdeg ah

- Intee inleeg ayaad ku leedahay mulkiilaha

Qareenka mulkiiluhu wuxuu ku doodi doonaa sababta mulkiiluhu kuu barabixinayo. Markaa waxaad ka doodi doontaa sababta aanay u dhacayn.

❖ Hadii qaadigaagu aanu amrin barabixintaada, waxa jirta daaqad aad u yar kaas oo aad u waydiisan karto in go'aankaas dib laguugu tixgaliyo. La xidhiidh xeer ilaaliyahaaga hada.

❖ **Kaliya gudoomiyaha maxkamada sare uunbaa ku barabixin kara**. Mulkiiluhu ma badali karo qufulada oo qasabna kuguma saari karo.

Sideen ugu diyaargaroobi karaa dhagaysiga?

1. **Soo ururso dhamaan waraaqaha muhiimka ama dhokumantiyada aad u baahantahay** si aad uga doodo kiiskaaga. Tan waxa kujiri kara:

   - ☐ kiradaada iyo heshiiskii kiraynta
   - ☐ risiidhkaaga lacagtaadii deebaajiga
   - ☐ liiska hubinta biilasha kugu taagan
   - ☐ liiska shayada aad siga qaldan meel u dhigtay
   - ☐ risiidhada kirada iyo jeegaga la joojiyay
   - ☐ ogaysiisyada barabixintaada
   - ☐ Yeedhmooyinka iyo Cabashooyinka
   - ☐ nuquladaada Ogaysiiska Wargalinta iyo Jawaabta, kasoo ku shaambadaysan taariikhda aad u gudbisay qareenka mulkiilaha iyo maxkamada
   - ☐ qoraal kasta oo sheegaya kharashka ku baxay dayactirta waxyeelooyinka goobta
   - ☐ risiidhada dayactirka aad ka qabatay goobta
   - ☐ sawirada dhibaatooyin kasta ee ka dhacay goobta

- ❖ Keen asalkooda hadaad hayso. Keen nuqul dheeraad hadiiba ay doonayso maxkamadu inay hayso wax walba. Hadii aanad hubin inaad u baahantahay shay, keen si kastaba ha ahaatee!

2. **Waydii qof makhraati ah** kaasoo kaa caawin kara kiiskaaga **inuu yimaado dhagaysiga**. Waa inay si shaqsi ah u arkaan burburka ama ismaandhaafka u dhexeeya mulkiilaha iyo kiraystahaaga. Makhraatiyaal badan oo aqoon gaar ah u leh kiiskaaga, way wacantahay.

3. La soco sida nidaamku u shaqeeyo ka hor dhagaysiga. Waydii shaqaalaha maxkamada marka maxkamadu hayso dhegaysiga "kiis dib u dhigis ah". **Soo fadhiiso dhagysida kale** si aad fikrad uga hesho sida kaaga noqon doono.

4. Ka hor dhagaysiga, **ku celceli waxaad doonayso inaad dhahdo.** Soo bandhigistaadu waa inay habaysnaatoo oo ay koobnaataa. Samayso liis kuu sheegaya dhibcahaaga muhiimka ah.

5. **Ogow makhraatiyaashaada ka hor intaan hawsha lagalin** maxad waydiinaysaa iyaga.

Ka waran hadaanad ku hadli karin Ingiriisiga?

Hadii aanad ku hadli karin Ingiriisi ama aad qabto dhib xaga maqalka ah, waxaad xaq u leedahay in turjumaan ka hesho maxkamada. **Waa in maxkamadu ogaataa xili horeba** inaad u baahantahay turjumaan.

Halkeen u tagayaa dhagaysigayga?

Hadii dhagaysigaagu yahay onlaayn, raac tilmaamaha sida loo galayo waxa laga yaabaa inaad dejisato ablikayshan, sida Zoom. Hadii dhagaysigaagu yahay mid shaqsi ah, waydii oo ka hubi shaqaalaha maxkamada xiligaag imaynayso xarunta maxkamada. Shaqaalaha ayaa kuu sheegi doona meesha la tagayo. Waxa laga yaaba inay soo dhajiyaan liiska kiisaska ay maxkamadu ku dhegysan doonto maalintaa meel ka baxsan maxkamada **ama** waxay ka hor akhriyi doonaan ka hor intaanu bilaabmin kulanku. Hadii aanay liistayn ama aanay akhriyin magacaaga, arag shaqaalaha maxkamada.

Maxaa dhacaya dhagaysiga?

Qaadigu wuxuu ku bilaabaa badanka inuu sharaxo nidaamka. Deetana uu u yeedho kiiska koowaad.

Marka qaadigu ku dhawaaqo kiiskaaga, soo kac adigoo sita cadaymahaaga iyo makhraatiyaashada. Badanka, dhamaan xeer ilaaliyaasha, difaacayaasha, iyo makhraatiyaashu waa inay dhaartan si ay runta usheegaan ka hor intaanay cadaymo keenin.

Maxaan odhanaya marka dhagaysigu socdo?

1. Sharax sababta mulkiiluhu kuu barabixinayo. U sheeg xaakinka hadii aan mulkiilahaagu samayn wax dayactir ah oo loo baahnaa, sheeg inanad kiro bixin se aad ku hagaajisay, in aan lagu siin wax ogaysiis ah si loo badalo xeerka, ama lagu siiyay wax ogaysiis ah xili dambe. Hadii aad ka jartay kharashaadka dayactirka kirada, markaa dheh.

2. Tus qaadiga wixii cadaymo ah ee muujinaya waxaad soo iibisay. Ka eeg “Sida aan ugu diyaargaroobayo dhagaysiga,” xaga sare.

3. Hadii aad haysato makhraati, u sheeg qaadiga sidad ujeclaan lahayd inay u keenaan cadaymaha. Waydii makhraatigaaga waxyaabaha ku saabsan sababta mulkiiluhu kuu barabixiyay. Iyo waxa ay ka ogyihiin waxa aad u sharaxday qaadiga.

Hadii mulkiiluhu isku dayayo inuu ku barabixiyo oo aanad bixin kiradii, waxaad waydiin kartaa maxkamada qorshaha lacag bixinta. Isticmaal Nidaamka Dib usoo Celinta Kirada ee ku xusan xeerka RCW 59.18.410(2) iyo Foomka Amarka Xadidaaha Ismaandhaafka dadka.

Goorma ayuu qaadigu ku dhawaaqayaa go'aanka?

Kadib dhagaysiga labada dhinacba, qaadigu wuxuu go'aamin karaa mid kamid ah kuwan soo socda:

1. **Waxaad wayday kiiska**. Qaadigu wuxuu go'aaminayaa inaanad lahayn wax difaacis wanaagsan oo ku aadan barabixintaada. Qaadigu wuxuu go'aamin

karaa in gudoomiyaha maxkamada sare kaasaari karo guri. Qaadigu wuxuu go'aamin karaa inaad ku leedahay lacag muulkiilaha. Qaadigu waxa laga yaabaa inuu kuu sheego inta ay tahay inaad siiso mulkiilahaaga, ama go'aankaa ka gaadho mar dambe.

2. **Waad guulaysataay**. Qaadigu wuxuu go'aaminayaa inaad soo jeedisay difaacasho wanaagsan oo ku waajahan barabixinta. Qaadigu wuxuu meesha ka saarayaa kiiska. Awood uma lihid inaad baxdo, ugu yaraan hada. Qaadigu wuxuu xukumayaa nidaamkan maxaa yeelay mulkiiluhu muu raacin nidaamyada saxda ah ee barabixinta. Mulkiiluhu wuxuu wali awood u leeyahay inuu mar dambe ku barabixiyo, kadib markuu hagaajiyo qalad kasta oo la sameeyay intii la waday barabixinta.

3. **Qaadigu wuxuu u baahanyahay baadhis dhamaystiran si uu u go'aamiyo kiiska**. Waxaad heli karaa taariikhda baadhista. Hadii aad wali ku nooshahay hantidii, waxa jiri doona baadhis 30 cisho gudahood ah.

Miyaa xeer beegtidu dhagaysatay kiiskayga?

Maaha “dhagaysiga maxkamada dib loo dhigay.”

Hadii qaaadigu amro baadhis dhamaystiran, waxaad xaq u leedahay xeerbeegti. Hadii aad doonayso hal, inaad ogaato inaad bixin karto mid ahaan. Waydii macluumaad dheeraad ah shaqaalaha maxkamada.

Ka waran hadii aan ka maqnaado Dhagaysiga Maxkamada Dib loo Dhigay?

Hubi inaad tagto oo aad xili hore imaan doonto. Hadii aanad tagin, ama dhawr daqiiqo dib u dhacdo, caadi ahaan waad waayi karta. Garsooruhu wuxuu u ogolaan doonaa milkiilaha inuu ku barabixiyo. Gudoomiyaha maxkamada sare wuxuu kugu qasbi karaa inaad ka baxdo guriga. Waxa laga yaabaa inaad bixiso wax kasta oo Cabashada mulkiilaha ku waydiisto. Tan waxa kujira kirada, dhibaataynta, kharashaadka maxkamada, iyo fiiga qareenka.

Mulkiilaha gurigaygu jidh ahaan ma igu qasbi karaa inaan ka baxo guriga?

Maya. Kaliya gudoomiyaha maxkamada ayaa kaa saari kara guriga. Mulkiiluhu waa inuu tagaa maxkamada si uu ula macaamilo gudoomiyaha maxkamda.

Waxaan helay "mudaynta barabixinta" ee Dhagaysiga Maxkamada Dib loo Dhigay. Miyaan wali joojin karaa barabixinta?

Waxaa laga yaabaa. Waa inaad horay u dedejisaa. Way adagtahay in la joojiyo barabixinta markay arintu halkan marayso. Waxa laga yaabaa inaad jooojiso hadii mulkiiluhu uu sameeyo wax qaldan oo ku aadan nidaamka barabixinta. Isku day inaad hesho caawimo sharciyeed.

Hadii lagu barabixiyay maxaa yeelay waxa lagugu leeyahay kiro, waxa laga yaabaa inaad awood u yeelato "in dib lagugu soo celiyo" kiradaadii (ilaasho kiradaada) hadii aad bixin karto shay kasta oo lagugu leeyahay (dib ugu soo noqoshada kirada, kharashaadka kirada iyo fiiga xeer ilaaliyaha) 5 cisho gudahood marka qaadiga maxkamadu uu gaadho go'aan kugu lidi ah. Waa inaad codsi qoraal ah u gudbisaa maxkamadda ("codsi") si tan loo sameeyo ka hor inta uusan gudoomiyaha maxkamadu kuu iman inuu ku saaro. Isticmaal Nidaamka Dib usoo Celinta Kirada ee ku xusan xeerka RCW 59.18.410(2) iyo Foomka Amarka Xadidaaha Ismaandhaafka dadka.

Waa inaad sidoo kale awood u leedahay inaad gudbisato codsi aad ku waydiisanayso qorshaha lacag bixinta. Isticmaal Codsiga si Aad ugu sugnaato Hirgalinta Mudaynta Barabixinta iyo Foomka Qorshaha lacag bixinta ee Ku Xusan xeerka RCW 59.18.410(3).

Codsiyadani way adagyihiin. Isku day inaad hesho caawimaad sharci sida ugu dhakhsaha badan uguna macquulsan.

Hel Caawinaad Sharci

- **Soo Wajahida Ka-Saarida Guriga?** Wac 1-855-657-8387.
- **Codso onlayn** CLEAR*Online - nwjustice.org/apply-online
- **Maku haysataa dhibaatooyin la xiriira deyn ka qaadashada dadka aad deynta ku leedahay?** Wac 1-800-606-4819.
- **Isagoo wajahaya arrin sharci ee Degmada King** (marka laga reebo Guri Ka-saarid ama La-wareegis)? Wac 2-1-1 (ama khadka bilaashka ah 1-877-211-9274) maalmaha shaqada 8:00 am - 6:00 pm. Waxay kuu gudbin doonaan bixiyaha kaalmada sharciga.
- **Isagoo wajahaya arrin sharci oo ka baxsan Degmada King** (oo aan ahayn Guri Ka-saarid ama La-wareegis)? Ka wac Khadka CLEAR 1-888-201-1014 maalmaha shaqada ee u dhexeeya 9:15 am - 12:15 pm ama ka codso onlaynt nwjustice.org/apply-online.
- **Waayeelka (da'da 60 iyo ka weyn)** oo leh arrin sharci oo ka baxsan Degmada King ayaa sidoo kale wici karta CLEAR*Sr ee 1-888-387-7111.
- **Dhagoolaha, dadka maqalka adag ama hadalka daciifka** ah ayaa wici kara mid kasta oo ka mid ah lambarradan iyagoo adeegsanaya adeegga gudbinta ee ay doortaan.

CLEAR iyo 2-1-1 ayaa bixin doona turjumaadyo.

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo laxariira xaquuqahaaga iyo waajibadka kusaaran. Looguma talogalin in lagu beddelo talo sharci oo gaar ah.

© 2021 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loosiiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Alliance for Equal Justice (Ururka isbahaysiga Sinaanta Cadaalada) iyo shaqsiyaad sababo kabaxsan ganacsi oo kaliya.)